

Suurat Al-Balad

سُورَةُ الْبَلَدِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Eebe wuxuu ku dhaaran Magaalada «Makaad ee Sharrifan».

2. Ood Nabiyo dagantahay dhexdeeda.

3. Iyo Nabi Adam iyo carruurtiisa «Dadka».

4. Ee Eebe Dadka wuu Abuuray iya-goo dhib iyo shaqo (Adduunka kala kulmi).

5. Ma waxayse u maleeyeen inaan cidna awood ku lahayn (dadku).

6. Dadka (Gaalada) waxay odhan wa-xaan bixiyey xoolo badan (si xaqa loo horjoogsado).

7. Ma wuxuu u maleeyay (xaq diiduhu) inaan cidna arkaynin.

8. Miyaannan u yeelin Laba indhood.

9. Iyo Carrab iyo Laba bishimood.

10. Oo miyaannan u caddaynin Labada Jid (khayrka iyo sharka).

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

لَا أُقْسِمُ بِهَذَا الْبَلَدِ ۝

وَأَنْتَ حِلٌّ بِهَذَا الْبَلَدِ ۝

وَوَالِدٍ وَمَوْلَىٰ ۝

لَقَدْ خَلَقْنَا الْإِنْسَانَ فِي كَبَدٍ ۝

أَيْحَسِبُ أَنْ لَنْ يَفْدِرَ عَلَيْهِ أَحَدٌ ۝

يَقُولُ أَهْلَكَ مَا لَأَلْبَدُ ۝

أَيْحَسِبُ أَنْ لَمْ يَرَهُ أَحَدٌ ۝

أَلَمْ يَجْعَلْ لَهُ عَيْنَيْنِ ۝

وَلِسَانًا وَشَفْهَتَيْنِ ۝

وَهَدَيْنَاهُ النَّجْدَيْنِ ۝

Magaalada Maka yuu Eebe ku dhaartay, maxaayeelay waa Magaalo barakaysan'Quraankana lagu soo dajiyay, Nabigana laga bixiyay, Kacbaduna ku taallo, Saas darteed waa in la wayneeyo, Addunkuna waa halgan iyo dhib, waase in xaqa la raaca loona adkaystaa' bixinta xooluhuna waa inay ahaataa dar Eebe, maxaayeelay? Eebe wuxuu inagu galladaystay nicmooyin badan, sida: Indhaha, Caqliga, Afka, Carrabka, iyo bishimaha, si aad wanaag ugu hadashid, waddadana Eebe waa ina tusiyay, si aan Jidka wanaagga u qaadno kan xunna uga leexanno.

Nabiguna wuxuu yidhi Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee: «Baladkan Ebe Wuu Xaaraam Yeelay Maalintuu Abuuray Samaawaadka iyo Dhulka, Waana Xaaraam Sida Eebe U Xarrimay Ilaa Qiyaamada, Geedkiisa Lama Rujiyo, waxaase la iibanneyay Saacad Maalin ka mid ah, Iyaduna waxay ku noqotay Xaaraamnimadeedii Shalay oo kale, ha Gaadhsiyo Midka jooga kan Maqan». Waxaa wariyay Muslim iyo bukhaari iyo Kutubta Sunnada ee kale. Al-Balad (1-10).

11. Ee Dadku muu jiidho Jiirta.

فَلَا أَقْنَحِمُ الْعَقَبَةَ ﴿١١﴾

12. Ma taqaannaa Jiirta.

وَمَا أَدْرَاكَ مَا الْعَقَبَةُ ﴿١٢﴾

13. Waa qoor la xoreeyo.

فَكَرْبَةُ ﴿١٣﴾

14. Iyo cunno la siiyo maalin gaajo.

أَوْ لَطَعْنِي فِي يَوْمِ ذِي مَسْجَبٍ ﴿١٤﴾

15. Agoon kuu dhaw.

يَتِيمًا ذَا مَقْرَبَةٍ ﴿١٥﴾

16. Ama Miskiin Dhulka ku dhagay (dhibaato darteed).

أَوْ مَسْكِينًا ذَا مَتْرَبَةٍ ﴿١٦﴾

17. Markaas la noqdo kuwa Ru-meeyay xaqa, isuna dardaarma Samirka, isuna dardaarma naxariista.

ثُمَّ كَانَ مِنَ الَّذِينَ آمَنُوا وَتَوَصَّوْا

بِالصَّبْرِ وَتَوَصَّوْا بِالْمَرْحَمَةِ ﴿١٧﴾

18. Kuwaasina waa kuwa Midigta mari.

أُولَئِكَ أَحْسَبُ الْأَيْمَنَةَ ﴿١٨﴾

19. Kuwaka Gaaloobayse Ayaad-kannaga waa kuwa jidka xun mari.

وَالَّذِينَ كَفَرُوا بِآيَاتِنَا هُمْ أَصْحَابُ الْمَشْأَمَةِ ﴿١٩﴾

20. Waxaana lagu dabooli Naar.

عَلَيْهِمْ نَارٌ مُّؤَصَّدَةٌ ﴿٢٠﴾

Qiimaha noloshu waa in Ruuxu halgamo xaqana raaco, dhibka halgankaasna u adkaysto, Dadka goommoonna wax ku taro, Gaar ahaan Agoonta iyo Masaakiinta, si markaas Ruuxu ugu mid noqdo kuwa sama falay ee samirka iyo naxariista is fara, Jidka wanaagsanna qaada xumaanna ka taga.

Rasuulkuna wuxuu yidhi «Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee: «Ruuxaan U Naxarriisaniin Kaannaga yar Oqoonsanninna xaqa ka wayn, naga mid ma aha». Waxaa wariyay Abuu Daawuud. Al-Balad (11-20).

Suurat Ash-Shams

سُورَةُ الشَّمْسِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Qorraxda iyo Barqinkeeda.

وَالشَّمْسِ وَضُحَاهَا ﴿١﴾

2. Iyo Dayuxu markuu Qorraxda raaco.

وَالْقَمَرِ إِذَا لِلنَّهَارِ ﴿٢﴾